

Abortion.

Sidee uur iskaga soo xaaqi karaa?

A: Asalamu'aleyku lataliye?

B:wcs , maxaan kuu qabtaa?

A: Arrin ayaa igu soo kordhay, waan jiranahay laba carruur ah ayaan haystaa, 1,3 bilood jir iyo 4 bilood jir. Labdoodaba uurkooda waa ku dhibtooday, Isbitaalka ayaan mar walba la i dhiginjiray, Lknse Alxamdullilhaa Alllah ayaa i maciinay oo aniga iyo ilmaha ina badbaadiyay.

Saaka ayaan is baaray mishiinkuna wuxuu ii sheegay in aan uur 4 asbuuc ah leeyahay. Waxaana aniga iyo ninkeygu/wadaadkeygu go'aansanahay in aan iska soo rido, waayo anigu ruux jiran oo daawo u socoto ayaan ahay, dhakhtarkuna wuxuu i dhahay ilmo ha dhalin intaa ka bogsanayso.

B:waan gartay, dhib ma leh ,lknse maad og tahay xilliga lagu ogolyahay in aad uurka iska soo xaaqi kartid iyo habka ama qaabka loo sameeyo?

A: maya

B: waan gartay wax yar ayaan kuu sharixayaa...

Dhibaatooyinka barbar socda uurka

1. Waxaan aaminsanahay, hadaanu nahay xarunta caafimadka FEM Süd iyo Xarunta DumarkaeFrauenabteilung der Stadt Wien loo soogaabiyey MA 57 in noloshu ay tahay haddiyad qaali ah , xitaa nolosha ilmaha aan welidhalan ee caloosha ku jira Si kastaba ha ahaatee, waxaajira xaalado nolosha kula gudboonaada, xaaladahaas ama dhibaatooyinkaas aad u aragto dhibaatooyin weyn, taasoo kugu dhalisa ama kuula muuqata mid in ilmaha ama uurkaan aad siisido wakhti xaadirkaan suuro gal ahayn.

Xaaladahani waxay ka mid yihiin ama keenaan, walwal, xag caafimaad ama dhibaatooyin xag dhaqaale, isfahamla'aanta qoyska, cabsi, ku keli ahaansho xaaladda cusub, argagax ama cabsi aad hore u soomartay safarkaadda qoxootinimo ama baqdin aad ka baqaysid ku keli ahaansho nolosha ama muciin ama lamaane la'aan

2. Haddii aad ku fekeraysid in ilmaha uurka ku jira aad soo tuurto, wadanka Ausrtia waxaa ka jira sharci xadidaaya iska sootuurida ilmaha uurka ku jira, waana 12 usbuuc gudohooda inta waqtigaa lagu gudo jiro waa(hadii aad fahansantahay sida uurka la isga so xaaqo ,kharashkiisa awoodikartid, dhakhtarkaaga haweenka la xiriir) ama haddi kale la xiriir meelaha lagala taliyo haweenka uurka leh eedoonaaaya in ay iskasoo xaaqaan sida uudhigaayo sharciga (§§ 96) raadso meelaha lagala taliyo haweenka uurka leh si laguula taliyo.(tani iyo cadeynta latalinta waxay cadeyn u yihiin dembila'aanta iska sooxaaqida uurka.)!!!

A: waangrty intee la xiriirikara ,oo la talin fcn i siinayso ,oo caymis ka helikaraa! Iyo Xaaqida lacag la'aan la iigu samayni?

Latalintau waa lacagla'aan waana sir u dhexeysa adiga iyo ururkaas. Taliyeyaasha lagama yaabo, adiga oo aan ogolaansho qoraal ah siin in ay sirtaada cid kale la wadaagaan. Qof kale na loo ma sheegaayo dhibaataada ama arrintaada. Haddii loo baahdo, qof turjubaan ah ayaa laguugu wacayaa, turjubaan kaasoo sidoo kale aan sharcigu u ogolayn in uu sirtaada faafiyo. Sidaas daraadeed kalsooni buuxda kuqab waadna ka hadli kartaa dhibaata kasta oo welwel iyo walbahaar kugu haysa.

Waxaana kaalashaqeyn doonaa mustaqbalkaada iyo rajada nolosha adiga iyo ilmahaaga. Wadahadalku wuxuu gogoldhig u yahay in aad dareento isku kalsoonaan iyo in aad dantaada garato. Waa wadahadal furan. Waxaan kaacaawinaynaa oo kula garabtaaganahay, go'aan ka gaaridaada arrimahaaga. Adiga ayaana u madax banan waana kugu ixtiraamaynaa taas.

Ragga iyo dumarka waxay heli karaan in qoys ahaan loola taliyo, ama keli keli ahaan.ama waxay kaloo soo kaxaysan karaan qof kaloo sadexaad oo ay kalsooni buuxda kuqabaan tusaale ahaanHooyada, walaashaa ama saaxiibadaa.

Haddii aad doonaysid, ka dib markii la talinta ay dhamaato, Waxaa lagusiinayaa warqad cadeynaysa inaad latalinta soo martay.

Waxaad awood u leedahay in aad hal mar ama dhowr jeer latalinta kusoo noq noqoto ilaa aad go'aan kamadambeys ah aad ka gaaraysid kaasoo ah in aad ilmaha yar iskasooxaaqdo iyo in aad uurkaaga deysato. Haweeney kasta waa in ay go'aanka ayada ka yimaadaa, ninkuna way(wu) ka madaxbanaan tahay go,aankeeda.

Sidoo kale Waxaa jira,wadooyin kale oo kuu banan oo aan ahayn in aad iska soo xaaqdo ilmaha, in aad ku dhasho meel qarsoodi ah oo cidkale ku ogaanayn dhalmadaada ka dibna aad u ogolaato ama aad siiso in ilmaha yar cid u baahan oo kale ay korsato. Lataliyaasha waxay ku siin doonaan macluumaad badan oo la xiriira arrintan waxayna kuula garab taaganyihiin caawinaado badan.

Meelo badanaa la kaashan karta arrintaas oo ay ka mid tahay Das Frauenservice Wien (MA 57), FEM Süd iyo orient express wien

Waqtiyada ama saacadaha ay xiran yihiin xafiiyada talosiinta kulana soo gudboonaato xaalad deg deg ah waxaad wici kartaa telefoonkaan:01 60 191 – 5201 halkaas Waxaa diyaar kuugu ah shaqaale luqado badan ku hadlaaya loona carbiyey in ay haweenka uurka lehtelefonka ka caawiyaan waanal acagla'aan habeen iyo maalinba diyaarbay kuuyihiin.

Lataliyeyaasheenu waxay kaloo kaala talin doonaan wixii xag dhaqaale ama wixii dhibaato ah ee muuqda waqtixaadirkan oo u baahan in degdeg loo xaliyo (Lacagaha ,xagga shaqada, guryaha, caafimaadka, xagga xanaanada carruurta iyo caawinaado kale oo badan).

Macluumaadka aad u baahantahay in aad ogaato ka hor ilmo iska sooxaaqida

1. Talosiinta ama latalinta iyo iskasoo xaaqida uurka waa in ay ugu yaraan 3 maalmood u dhexeysaa. Iskasoo xaaqida uurka Waxaa jira labo hab mid daawo aad qaadanaysid iyo mid intala gusuuxiyo lagaa soo xaaqaayo(Qaliin)

Waana khasab in dhakhtar / dhakhtarad ay sameeyso.

Lataliyuhum.....wuxuu kaa caawin doonaa sidii aadku heli lahayd xarun caafimaad,xaruntaa soo uu joogo qof afkaaga hooyo ku hadlaaya haddii loo baahdana Waxaa kuraacaya lataliyaha. Haddii aad doonaysid waxaad hore u soo kaxaysankartaa qof tarjubaan ah oo aadkukalsoontahay.

Ilmo iska soo xaaqida midka qaliinka ah caadiyan waa lagusuuxinayaa(suuxdinwaqtigaaban ah) markaas ayaa lagaa soo xaaqayaa waxaana lagusameeyaa rug caafimaad ama cusbitaal ka bacdina markay suntan suuxdinta ay jirkaada ka baxdo gurigaada ayaad aadaysaa.fadlan diyaarso haddii ay suurogal kuu tahay qof ku soo kaxeeya ama kaasoo wada cisbitaalka iyo qof carruurta kale kuu sii haya, haddii aad carruur leedahay ama weydiiso caawinaad lataliyahaaga.

Iskasoo xaaqida habka daawada waxaa la sameynkaraa oo kaliya inta lagu gudo jiro toddobaadka 9-aad ee uurka. Halkan waxa caafimaadkaada la socondoona(kunasookormeeridoona dhakhtar) laba

daawooyin oo laba maalmood u kala dhexeysa taasoo sooridaysa ilmaha uurka ku jira ayaa lagu siinayaa.

Dhiig baxyar, lab labo iyo xanuun fudud waa waxyeelo iskacaadi ah. sikastaba ha ahaatee, haddii ay qandho kuqabato, xanuun daran oo xagacaloosha hoose ah ama dhiig badan kaasoodaato, waa inaad sidegdeg ah ula xiriirtaa dhakhtarkaada / ama dhakhtaradaada haweenka.

Labo usbuuc ka dib iskasooxaqida uurka waxaad maraysaa baaritaan.

2. Ka horinta aadan uurka iskasoo xaaqin, waa in aad iska hubisaa kharashka: cidabixinaysa waxay kuxiran tahay xaaladdaada dhaqaale. Haddii aadshaqaysid mushahar kugu filan aad qaadatid, kharashkaada adigaa iska bixinaya, Haddii aad lacagta qoxootiga keliya ama ALG 2 kusoo gasho oo lacag kale kusoogalin, markaas waa lacagla'aan ilmo iskasooxaqida. Caymiska caafimaadka ayaa wuxuu ku siinayaa warqad cadayn ah oo ah in uu kharashka uubixinaayo.

3. Fadlan warqadda cadeynta ah ee lacagta lagaagashubaayo hore u qaado: markaad tagaysid rugta caafimaadka ama cisbitaalka:warqadda cadeynta in lacagta ay bixinayaancaymiska, warqada cadeynta lataliyeyaasha, warqadda soogudbinta, karaka caafimaadka, ama warqadd u dhiganta karaka caafimaadka, iyo haddii aad haysatid cadeynta ama kaarka nooca dhiigaada uuyahay, ama buuga yar ee hooyada iyodhalaanka.

4. Haddii aad go'aansatay in aad uurka ama ilmaha iska soo ridid ka dibna aad u siibaahantahay in lagula taliyo, lataliyeyaasheenu dabcandiyaar bay kuu yihiin waxayna kaala talindoonaan hababka ugu wanaagsan kala dheereynta carruurta iyo ka hortagga uurka.

Fadlan xusuusnow labo usbuuc dabadeed in ay suurogal tahay inaad uur kale qaadid kartid.